Ku cusub Sweden

Bogga Tusmooyinka

1	Diiwaangalinta Dawladda iyo aqoonsiga	4
2	Xanaanada, iskuulka iyo waxbarashada dadka waaweyn	5
3	Deegaanka	9
4	Ka shaqaynta iyo wadidda ganacsi	11
5	Daryeelka caafimaad, daryeelka ilkaha iyo uurka	13
6	Caawinta iyo deeqaha	15
7	Socdaalka iyo gaadiidka	16
8	Hawlaha	18

Diiwaangalinta dawladda iyo aqoonsiga

Ka hor inta aadan helin sharciga daganaanshaha rasmiga ah

Marka aad magangalyo ka raadinayso Iswiidhan, waa lagu sawiri doonaa. Ka dib waxaad heli doontaa kaarka LMA. Kani ma ahan kaarka aqoonsiga (ID kaar), balse waa cadayn inaad tahay magangalyo doon iyo in aad joogi karto Iswiidhan inta aad sugayso go'aan. Kaarka waxaa loogu talo galay shakhsi wuxuuna badalayaa warqaddii aad heshay markii aad soo gudbisay codsigaaga magangalyo.

La imaw kaarkaaga LMA marka aad la soo xiriirayso xukuumadaha. Mararka qaar waxaad u isticmaali kartaa kaarka LMA aqoonsi ahaan marka alaabo kaaga timaado dibadda ama aad ka qaadanayso boostada uu ku talo bixiyay Migrationsverket (Gudiga Socdaalka Iswiidhishka). Ka akhri wax badan www.migrationsverket.se

Marka aad hesho sharcigaaga daganaanshaha rasmiga ah

Marka aad doonayso inaad ku noolaato Iswiidhan waa inaad iska diiwaangalisaa diiwaanka dawladda. Ka dib waxaad heli doontaa lambarka aqoonsiga shakhsi. Aad Skatteverket (Hay'adda Canshuurta Iswiidhish) oo qaado baasaboorkaaga iyo dukumiintiyada muujinaya in aad haysato sharci daganaansho rasmi ah ama xuquuq dagnaansho. Waa inaad sidoo kale qaadataa shahaadada meherka iyo shahaadada dhalashada ee carruur kasta, haddii aad haysato dukumiintiyadan.

Xuquuq badan iyo waajibaad Iswiidhan dhexdeeda waxay ku xirantahay inaad ku jirto diiwaanka dawladda, iyo meesha aad iska diiwaangalisay. Tusaale ahaan, waa in lagaa diiwaangaliyay maamulka Växjö si aad u barato SFI (Iswiidhish Ee Muhaajiriinta) ee maamulka Växjö. Waa in laguu diiwaangaliyay ciwaanka aad dagantahay. Ogaysii Skatteverket haddii aad u guurtay ciwaan cusub.

Aqoonsiga (ID)

Waxaad u baahantahay Aqoonsiga Iswiidhishka si laguu cadeeyo qofka aad tahay. Waxaad u baahan kartaa tan marxalado kala duwan, tusaale ahaan bangiga ama ballamaha dhakhaatiirta. Aqoonsiga Iswiidhishka wuxuu muujniyaa lambarkaaga aqoonsiga shakhsi ee Iswiidhishka. Waxaa badanaa lagu waydiin doonaa lambarkaaga aqoonsiga shakhsi.

Aqoonsiga wuxuu noqon karaa laysinka darawalnimada Iswiidhishka ama kaarka aqoonsiga.
Skatteverket in lagu siiyo kaarka Aqoonsiga, waa inaad:

- bixisaa lacagta inta aadan booqan Skatteverket
- booqataa xafiiska Skatteverket bixiya kaararka Aqoonsiga
- cadayn kartaa qofka aad tahay, tusaale ahaan sharcigaaga daganaanshaha rasmiga ah
- ku jirtaa diiwaanka dawladda ee Iswiidhan

Goobaha Kulanka iyo Warbixinta

Maamulka Växjö waxay ka qaybgashaa Goobaha Kulanka iyo mashruuca warbixinta. Mashruuc waxaa laga wadaa in hay'adda ay tahay inaad booqato marka aad hesho sharciga daganaanshaha rasmiga ah ee dhamaan ku yaala isku meel. Tan waxay kuu noqon mid fudud maadaama tahay qof cusub oo hadda soo galay waxayna sidoo kale gaabin wakhtiyada sugidda. Xafiisku wuxuu ku yaalaa Norrgatan ee Växjö.

Waxaa laguugu yeeri doonaa xafiiska marka go'aan laga gaaro in lagu siiyo sharciga daganaansha rasmiga ah. Xafiiska waxaad marka hore ka heli doontaa warbixin Migrationsverket ku saabsan sharcigaaga daganaanshaha rasmiga ah. Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa Skatteverket waxa ku saabsan diiwaanka dawladda iyo lambarka aqoonsiga shakhsi.

Sidoo kale waxaa garab socda Arbetsförmedlingen (Adeegga Shaqaalaysiinta Bulshada Iswiidhishka), waxayna kaa caawin doonaan inay kuu jeexaan qorshe la halmaala shaqaalanimo ama waxbarasho. Waxaa sidoo kale laguu diiwaangalin Försäkringskassan (Hay'adda Caymiska Bulshada Iswiidhishka), waxaadna la hadli kartaa Pensionsmyndigheten (Hay'adda Hawlgabka Iswiidhishka) iyo Maamulka Växjö. Hay'aduhu waxay la qabadsiin taageeradooda adiga iyo baahiyahaaga shakhsi.

Xanaanada, Iskuulka iyo waxbarashada dadka waaweyn

Xanaanada 1-5 sano

Xanaanada wuxuu u jiraa carruurta u dhexeysa 1 iyo 5 sano da'da. Ciyaarta waa muhiim xanaanada. Haddii aad shaqaynayso ama wax baranayso, ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahy in la galiyo xanaano marka aad jirto shaqada ama iskuulka. Haddii aadan shaqayn ama fasaxa waalidka ku jirto, ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay xanaanada dadweynaha. Xanaanada dadweynaha waxay bilaabataa Sibtembar sannadka taasoo ilmuhu galayo 3. Xanaanada dadweynaha waa 15 saacadood asbuucii.

Diiwaangalinta

Haddii aad timid uun Iswiidhan, adeegga qaabilaadda Landningsbana Växjö waxuu kaa caawin doonaa inaad codsato goob xanaano. Garaac lambarka xiriirka maamulka ee 0470 410 00 wayna ku caawin doonaan. Waxay sidoo kale kaa caawin doonaan, tusaale ahaan, haddii aad ka soo guurtay maamul ood u soo guurtay maamulka kale ee Växjö.

Waxay qaadan kartaa ilaa afar bilood in la helo goob xanaano. Waxaa ilmaha la galin doonaa mid ka mid



Nidaamka iskuulka Iswiidhan

ah xanaanooyinka goobta meeshaas oo ilmaha laga diiwaangaliyay diiwaanka dawladda.

Qiimaha

Lacagta daryeelka ilmaha waxay ku xirantahay dhaqaalaha qoyska (dhaqaalaha canshuurta ka dib), inta ay carruur leeyihiin qoyska ee ku jirta xanaanada iyo inta saacadood ee ilmuhu xaadiro xanaanada. Waxaad bixin lacagta bil kasta ee dhamaan 12 ka bilood ee sannadka.

Iskuulka khasabka ah 6-16 sano

Iswiidhan dhexdeeda, waa inaad tagtaa iskuulka khasabka ah ilaa sagaal sano. Waa caam in ay carruurtu bilaabaan iskuulka khasabka ah dayrta sannadka ay jirsadaan 7. Iskuul kasta oo khasab ah wuxuu leeyahay fasal xanaano carruurta jira 6. Dhamaan carruurta waa inay xaadiraan iskuulka khasabka ah; si kale hadaan u dhigno ma ahan mid laga maarmo. Kharashka lacagta iskuulka

Marka aad dhawaan timid Iswiidhan ood rabto inaad bilawdo iskuulka khasabka ah, waxaad sida caadiga ah la bilaabi fasalka diyaargarawga carruurta kale ee dhawaan timid. Balse isla markaasba waxaad yeelan fasal caadi ah, meeshaas ood bilaabi doonto marka aad diyaar noqoto. Waxaa jira qiyaastii 45 iskuulada khasabka ah maamulka Växjö .

Diiwaangalinta

Haddii ilmahaagu ku jiro fasalka xanaanada ood doonaysid inay ku sii jiraan iskuulkaas, uma baahnid inaad wax samayso. Haddii kale Landningsbana Växjö waxay kaa caawin doontaa xiriirka iskuulka. Garaac lambarka xiriirka maamulka ee 0470 410 00 wayna ku caawin doonaan.

Qiimaha

Iskuulka, cuntada iskuulka iyo buugta iskuulka waa bilaash. Hase yeeshee, waa inaad ka taxadartaa buugta, kombiyuutarada yaryar iyo waxkasta ood ka heshay iskuulka. Haddii ay haleeyaan ama lumiyaan waa inaad ka bixiso.

Cuntada gaarka ah ama xajiin?

Haddii aad haysato aqoonsiga elektarooniga ah, waxaad ka jawaabi kartaa su'aalaha ku saabsan xajiinta ilmahaaga ama cuntada gaarka ah u baahanyahay ayadoo la marayo adeegga elektarooniga maamulka xaafadda ee xogta ilmaha iyo ardayga, taasoo laga heli karo websaydka Maamulka Växjö. Haddii aadan lahayn aqoonsiga elektarooniga waa inaad la xiriirtaa iskuulka ilmaha si toos ah si looga jawaabo su'aalahan.

Iskuulka ugu sareeya, 16-20 sano

Iskuulka ugu sareeya waa bilaash waana qaab mudadawacnimo ood dooran karto ka dib markaad dhamayso iskuulka khasabka ah. Barnaamijka iskuulka ugu sareeya ee qaran wuxuu ku dhamaadaa ilaa saddex sano. Växjö dhexdeeda waxaa jiraa saddex iskuulada ugu sareeya xaafadda iyo dhawr iskuulada ugu sareeya ee madax banaan.

Codsiga

Haddii aad timid uun Iswiidhan, adeegga qaabilaadda Landningsbana Växjö waxuu kaa caawin doonaa inaad codsato. Garaac lambarka xiriirka maamulka ee 0470 410 00 wayna ku caawin doonaan. Xitaa waxay dadka ka caawin karaan kuwaas oon dhawaan imaan balse raba inay codsadaan iskuulka ugu sareeya.

Hordhaca luuqadda

Hordhaca luuqadda waxaa loogu tala galay dadka kuwaas dhawaan soo galay Iswiidhan iyo kuwa aan u qalmin barnaamijka qaran ee iskuulka ugu sareeya. Casharku wuxuu diiradda saaraa luuqadda Iswiidhishka sidaa darteed waxaad u wareegi kartaa barnaamij iskuulka ugu sareeya oo kale ama kooras. Kooraska waxaa loo qorsheeyay oo loo ansixiyay awoodaha ardayda. Iskuulada ugu sareeya maamulka Växjö, hordhaca luuqadda waxaa laga heli Kungsmadskolan iyo Katedralskolan.

Haddii aad dhawaan timid Iswiidhan ood haysato sharciga daganaanshaha rasmiga ah, waxaad xaq u leedahay inaad bilawdo kooraska hordhaca luuqadda ka hor dhamaadka wakhtiga guga ee sanadka marka aad gaadho 20 (18 ee magangalyo doonayaasha).

Iskuulada khasabka ah ee gaarka ah iyo iskuulada ugu sareeya ee gaarka ah

Carruurta qabta fahan darada waxbarashada waxay badanaa la macaamili karaan iskuulka khasabka ah ee caadiga ah. Hadaba wuxuu ilmuhu xaadiri karaa iskuulka khasabka ah ee gaarka ah. Växjö dhexdeeda waxaa jira iskuulada khasabka ah ee gaarka ah iyo iskuulada ugu sareeya ee gaarka ah.

Haddii aad tahay waalidka ama korsadaha ilmo kaasoo ay tahay inuu xaadiro iskuul gaar ah, kala xiriir maamulka Växjö 0470 410 00 oo codso inaad la hadasho madaxa macalinka masuulka ka ah qaabilaadda iskuulka gaarka ah. Maamulka waxay fulin doonaan qiimeyn waxbarasho, saykoolajikaal, caafimaad iyo bulsho si loo go'aansado in kani yahay iskuulka ku haboon ilmaha iyo inkale.

Iskuulka gaarka ah, ardaydu waxay helaan waxabarashada loo ansixiyay xaaladahooda gaarka ah oo ku salaysan manhajka. Iskuulka ugu sareeya ee gaarka ah wuxuu u diyaariyaa ilmaha noolasha qofka weyn, shaqada, guryenta iyo raaxaysi. Iskuulada gaarka ah waxay leeyihiin fasallo ay dhigtaan dhawr arday.

Carruurta magangalyo doonka iyo kuwa aan la wehelin

Carruurta aan la wehelin waxay xaq u leeyihiin in wax labaro ayadoon loo eegin in ay joogi doonaan Iswiidhan ama lagu celiyo wadankoodi hooyo. Caruurta magangalyada doonka ah waxay xaq u leeyihiin in wax labaro sida uun carruurta kale Iswiidhan oo kale, balse xaadiridda iskuulka khasabka ah ma qabanayo magangalyo doonayaasha. Xaadiridda iskuulka khasabka ah waxaa loo la jeedaa in aad xaq u leedahay inaad wax ka barato iskuulka khasabka ah, balse sidoo kale waa inaad ka qaybgashaa fasalada iskuulku agaasimo.

Waxaad akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan iskuulka Iswiidhan **luuqado kala duwan halkaan:** www.omsvenskaskolan.se

Xarumaha madadaalada dhalinyarada

Maamulka Växjö waxaa jira wax badan oo ah goobo kulan amaan ah oo furan dadka dugsiga sare. Halkaan waxaad kula kulmi kartaa saaxiibo waxaadna ka qayb-qaadan hawlo qorshaysan oo badan. Shaqaalaha ka shaqeeya xarumaha madadaalada dhalinyarada waxaa loo tababaray hagayaasha raaxaysiga ama in ay la shaqeeyaan dhalinyarada.

Xarunta madadaalada dhalinyarta waxaad ciyaari kartaa ciyaaraha gaymka, gaymka miiska, dhagaysiga muusig, ka qayb-galidda hawlaha sida tartamada, isreeb-reeb, jaasid, filimka fiidadka iyo waxyaabo badan. Qaar habeenada waxaa kali ah oy u furanyihiin gabdhaha. Sidoo kale xarumaha madadaalada dhalinyarta waxaa lagu habeeyaa safarro.

Maadaama oo tahay waalid ama korsade marwalba waa lagu soo dhawayn inaad imaato. Sigaar kuma cabi kartid khamri kuma cabaysid ama kuma isticmaali kartid daroogo kale xarumaha madadaalada dhalinyarada. Xarumaha madadaalada dhalinyarada ee maamulka waxay ku yaalaan iskuulada sare waxayna furanyihiin maalintii iyo waliba fiidadkii, maalmaha fasaxa iyo ciidaha.

BG

Bergendahlska gården (BG) waa goob kulan laagu talagalay dhalinyarada. Halkaan waxaad ka heli kartaa:

- BG-musik – qolalka tijaabada, istuudiyaha iyo dhismayaasha masraxa.
- BG Ung – goob kulan furan galbihii iyo fiidadkii. Halkaan waxaad ku cabi kartaa bun, samee shaqadaada guri, ciyaar PS4, daawo ciyaar ama filimo iyo waxyaabo badan.
- Ungdomskontoret – Ungdomskontoret waxay leedahay xog ku saabsan waxyaabaha badankood saameeya dhalinyarada, laga bilaabo shaqooyinka ciidaha ilaa hawlaha xagaaga.
- FältNavigator – waa dadka u dhexeeya 16 iyo 24, kuwaas oon iskuul tagin ama wax kale aan haynin oo camal ah. Ujeedada waa in lagaa caawiyo helidda qaabkaaga inaad waxbarato ama shaqayso.

Landningsbana Växjö

Landningsbana Växjö waa xarunta qaabilaadda ee qoysaska qaxootiga cusub iyo carruurta aan la wahelin Växjö. dhexdeeda. Waxaad imaan halkaan marka aad soo gasho Växjö waxaadna ka sugi go'aan Migrationsverket. Landningsbana Växjö, carruurta iyo waalidiinta waxay helaan taageero iyo tababar fahanka bulshada Iswiidhan iyo sida nidaamka iskuulka Iswiidhan u shaqeeyo. Shaqaalaha ka shaqeeya Landningsbana Växjö, waa macalimiin tababaran, kalkaaliyayaal, gudi arday, shaqaalaha caawinta luuqadda iyo macalimiinta xanaanada. Shaqaalaha waxay ku hadlaan luuqado badan oo kala duwan. Waxaa sidoo kale jira shaqaale luuqad oo saacadle ah luuqadaha yaryar.

Carruurta iyo waalidiinta ama korsadayaasha labaduba

Landningsbana Växjö, carruurta waxay muujin karaan waxbarashadoodi hore. Shaqaalaha jooga Landningsbana Växjö waxay ka caawin dukumiintiga

ilmaha xirfadihiisa iyo aqoonta. Waxay sidoo kale go'aansan haddii ilmuhu u baahanyahay caawin dheeri ah. Carruurta, waalidiinta (ama korsadayaasha) waxay heli karaan caawin inay u diyaar garoobaan xanaanada iyo iskuulka Iswiidhan.

Waalidiinta iyo korsadayaasha waxay baran karaan wax badan oo ku saabsan noolasha qoys ee Iswiidhan waxayna waydiin su'aalaha la xiriira khibradahoodii hore. Landningsbana Växjö, waxay baartaa in qoyska leh waayo aragnimada hagardaamo ama wax kale waxay ka dhigantahay in qoyska u baahanyahay caafimaad iyo daryeel daaweyn. Waxaad sidoo kale heli xog ku saabsan waxarashada, noqoshada waalid Iswiidhan dhexdeeda, hawlaha raxaysiga iwm. ee luuqaddaada. Wax kharash ah kuguma kacayo inaad booqato Landningsbana Växjö.

Xiriirka
Garaac xarunta xiriirka maamulka ee 0470 410 00 waxayna kaa caawin doonaan helidda qof haboon Landningsbana Växjö.

Waxbarashada dadka waaweyn

Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn
Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn, dhamaan waxbarashada dadka waaweyn ee maamulka waxaa lagu bixiyaa hal meel. Casharada waxay diyaar u yihiin dhamaan dadka waaweyn kuwaas oo raba inay bartaan si ay shaqo u helaan ama badalaan xirfadda. Xaq ayay u leedagay koorsooyinka laga bilaabo 1 Juulay sannadka aad galayso 20 ama haddii aad haysato shahaadada dugsi sare ee iskuulka ugu sareeya ood u baahantahay dhamaystir. Waxaad ka heli kartaa Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn ee ku taal Kungsgatan 9 ee Växjö. Ka akhri waxbadan **www.vaxjo.se/vuxenutbildning** ama garaac lambarka Maamulka Växjö ee 0470 410 00.

SFI
Haddii luuqaddaada hooyo ahayn Iswiidhish, waxaad ku baran kartaa Iswiidhishka Muhaajiriin ahaan (SFI) Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn. SFI waa koorso bilaw ah luuqadda Iswiidhishka. Ujeedadu waa adi in aad hesho aqoon Iswiidhishka sidaa darteed waxaad la macaamili kartaa shaqada iyo hawlaha maalin kasta. Waxaa jira afar kooras: A, B, C iyo D. Waxaad dooran kartaa inaad barato maalinta ama fiidkii. Koorsooyinka waxay keenaan fasal. Koorsiga Xarunta Waxbarshada Dadka Waaweyn (SFI) waxaad sidoo kale ku baran kartaa sida dadka Swiidhishka u shaqeeyaan.

Jaamacad iyo macad

Jaamacadda Linnaeus waxay ku taalaa Växjö. Halkaan waxaad ku qaadan kartaa koorsooyin kala duwan. Si aad u dhigato jaamacadda waa inaad qabtaa waxbarashada iskuulka ugu sareeya ama mid la mid ah. Barta www.studera.nu waxaad ka akhrin kartaa waxbadan oo ku saabsan waxa tani tahay iyo waxa aad samaynayso haddii aad rabto inaad dhigato Jaamacadda Linnaeus ama jaamacad kale.

Xaqiijinta iyo qiimeynta waxbarasho wadan kale
Ma haysataa waxbarasho wadan kale? La xiriir Universitets- och högskolerådet (Golaha Iswiidhish ee Aqoonta Sare), taasoo qiimeysa waxbarashooyinka iskuulka sare ee wadan kale, xirfad macad, waxbarashada sare. Ka akhri wax badan www.uhr.se. Ma haysataa khibrad shaqo balse aan lahayn shahaado? Hadaba waxaad heli caawin in xirfadahaada la qiimeeyo. Booqo www.valideringsinfo.se oo raadi hay'adaha xaqiijinta kala duwan.

Haddii shahaadooyinkaaga wadan kale ay tahay in la qiimeeyo, waa in marka hore loogu turjumaa Iswiidhish. Haddii shahaadooyinku ku qoranyihiin Ingiriis, Faransiis, Garman, Isbaaniish, ama luuqadaha Nordic, uma baahna in loo turjumo. Turjumaadda waa inuu fuliyay turjumaan la xaqiijiyay.

Waxaad sidoo kale caawin ka heli in aqoontaada la qiimeeyo. Tan micnaheedu waa in la fuliyo qiimeynta xiirfaddaada ee aqoontaada ayadoo lagu samaynayo wadasheekaysi iyo tijaabo ficil ah.
Booqo **www.valideringsinfo.se** wixii xog dheeri ah.

Daymaha waxabarashadaada

Xarunta Gudiga Deeqaha Ardayga (Centrala studiestödsnämnden, CSN) waxay qabtaan go'aanada ku saabsan iyo lacag bixinta cawimaadda ardayga Iswiidhish; si kale deeqda iyo daymaha dadka wax ka baranaya Iswiidhan iyo dibadda. Waxay sidoo kale la macmilaan gudidda daynta. Booqo **www.csn.se** wixii xog dheeri ah.

Deegaanka

Ka hor inta aad helin sharcigaaga daganaanshaha rasmiga ah

Haddii aadan haysan meel aad dagto inta aad sugayso go'aanka codsigaaga magangalyo, Migrationsverket waxay kaa caawin kartaa. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad hesho deegaan aad dagto, tusaale ahaan qoys ama saaxiibo. Haddii aad hesho deegaan aad dagto, waa inaad ku wargalisaa Migrationsverket ciwaankaaga sidaa darteed way kaala soo xiriiri karaan. Ka akhri wax badan websaydka Migrationsverket: **www.migrationsverket.se**

Raadinta deegaan

Waxaad ku soo biiri kartaa liiska sugidda deegaan ee Maamulka Växjö wakhti kasta. Waxaad ka samayn tan Boplats Växjö: **www.boplats.vaxjo.se**. Websaydka waxaad ka samaysan kartaa akoonti haddii aad raadinayso deegaan. Ka dib waxaad bilaabi inaad hesho dhibco. Galidda liiska sugidda deegaan qiimahiisu waa SEK' 100 sannadkii. Waxaad isku diiwaangalin kartaa liiska sugidda deegaan laga bilaabo sanadka kaasood jirsatay 17. Tani waxay tabakhaysaa ayadoon la eegaynin bisha taasoo aad jirsatay 17.

Hadaba waa inaad firfircooni yeelataa oo gashaa websaydka oo raadisaa deegaan. Haddii aad hesho deegaan aad xiisaynayso iska diiwaangali rabitaankaaga. Haddii aad tahay mid ka mid ah lixda qof ee faylka ugu horaysa, waxaad heli doontaa casuumaad inaad gasho ood ka fiiriso deegaan. Ka dib tan waa inaad dhahdaa haa ama maya; si kale waa inaad ka bixisaa jawaab sax ah in la sheego in aad rabto iyo inkale. Qofka haysta dhibcaha ugu badan kaasoo dhahay haa ayaa la siin doonaa deegaan marka koobaad.
Waxaa sidoo kale jira dhawr guryo shakhsiyaad maamulka Växjö, qaar ka mid ah sidoo kale waxay ku jiraan liiska sugidda. Wargayska Smålandsposten waxaad sidoo kale ka heli kartaa xayisiinta kuryaha shakhsiyaad ee mulkiilayaasha guryaha ama dadka deegaanka kuwaas raba in ay ijaaraan guryahooda. Waxaad sidoo kale xayisiin kartaa in aad raadinayso deegaan. Waxaad sidoo kale ka raadin kartaa deegaan www.blocket.se.
Waxaa jira guri yaraan maamulka Växjö, sidaa darteed waa macquul inaad u raadiso deegaan dhawr qaab oo kala duwan iyo waliba in laga raadiyo deegaan xuduudaha ka baxsan magaalada.

Haddii aad rabto inaad iibsato guri waxaad ka raadin kartaa **www.hemnet.se**

Habeynta qashinka guriga

Falaatyada badankood ama guryaha maamulka Växjö waxay habeeyaan qashinkooda. **Tani** waa muhiim dib u samaynta alaabada iyo isticmaalka ilaha dabeeciga ah sida ugu yar ee ugu macquulsan. Qashinka cuntadaada waa in lagu habeeyaa bacaha midabka buniga ah leh ee gaarka ah. Ka dib waxaad galin bacaha baaldiga qashinka midabka booraha ah. Qashinka cuntada waa, tusaale ahaan, hadhaaga karinta cuntada, lafaha hilibka, kaluunka iyo diyaagga iyo midhaha iyo qudradda waxyaabaha ka hara. Qashinka cuntada waa la habeeyaa waxaana laga dhigaa gaas, shidaal u wanaagsan deegaan ahaan taasoo basaska magaaladu ku shaqayn. Hadhaaga qashinka cuntada waxaa loo adeegsadaa bacriminta beeraha sidaa darteed cunto cusub ayaa laga soo saari karaa.

Qashinkaaga caadiga ah – waxyaabaha aan ahayn shayada bacaysan ama qashinka cuntada – waa in lagu ridaa bacda. Ka dib bacda waa in lagu ridaa baaldiga qashinka ee cagaaran.

Dhamaan bacahaaga, baakadaha, dhalada iyo xirmooyinka birta ah waa in la habeeyaa oo la geeyaa xarunta qashin samaynta ama meesha qashin samaynta ee aagga deegaankaaga. Xirmooyinka waa in la habeeyaa sidaa darteed waa la hagaajin karaa waxaana laga dhigi xirmooyin cusub.

Waxyaabaha waaweyn ee aadan ku ridi karin baldiyada cagaaran ee qashinka caadiga ah waxaa la gayn karaa xarunta qashin hagaajinta. Xarunta qashin hagaajinta waxaad gayn kartaa waxyaabaha sida alwaaxda, alaabta guriga, bacaha waaweyn iyo alaabada elaktarooniga ah. Wax kasta waa la hagaajin oo waxaa loo diri dib u habeyn ama qashin daadis.

Qashinkaaga khatarta ah badanaa waa in la geeyaa xarunta qashin hagaajinta. Qashinka khatarta ah waa waxyaabaha waxyeelayn kara deegaanka haddii lagu tuuro deegaanka. Tusaale ahaan qashinka khatarta ah waa kiimikada, riinjiga, beetaryaha, taleefoonada moobaylka, nalalka iyo nalalka dheerdheer.

Biyaha iyo nadaafadda

Biyaha ka imaada tuubada ee gurigaaga waa amaan in la cabo oo loo isticmaalo cunto karinta. Uma baahnid inaad ka soo iibsato biyaha caagadda tukaan. Xasuusnaw inaad xirto tuubada marka aadan isticmaalaynin biyaha. Tan waxay gacan ka gaysan kaydka biyo nadiif ah.

Marka aad wax dhaqayso ama nadiifinayso, isticmaal waxyaabaha nadiifinta ee u wanaagsan deegaan ahaan, ha raacin kiimikada baafka oo isticmaal cadad yar oo waxyaabaha wax lagu nadiifyo marka aad dhaqayso dharka. Tan waxay gacan ka gaysan ilaalinta deegaanka iyo biyo nadiif ka ah kiimikada sunta ah.

Dufanka sida saliidda cunatada waa in lagu shubaa caagad ama kaartoonka caanaha oo ka dib lagu ridaa qashinka ee qolka qashin dhigidda ama baaldigaaga cagaaran ee qashinka. Dufanka ku dareera dhuumaha bulaacadda waxay keeni karaan xanibaad.

Dufanka daawaha iyo baaqquliga waxaa lagu tirtiri karaa istaraashada jikada taasoo ka dib lagu ridi bacda ee qashinka cuntada. Ka dib maamulka waxay u qaabeyn gaas u wanaagsan deegaan ahaan gaawarida iyo basaska.

Waxaad suuliga ku biyo raacin kartaa kaadida, saxarada iyo waraaqaha suuliga; wax kale ma lahan. Haddii waraaqaha tirtiridda, istaraashada jikada, tirtiraha, suufka, xafaayadaha ama istaraashooyinka nadaafadda la raaciyo suuliga dhuumaha ayaa xirmi doona. Tan waxay sababi kartaa ku daadid gurigaaga.

Caymiska guri

Qof kasta wuxuu u baahan caymis guri. Caymiska guri waa nooc ah qaybaha caymiska oo ku siin kara lacag haddii waxyaabo lagaa xaday ama lagaa haleeyay.

Dhamaan siyaasadaha caymiska guri sidoo kale waxay ka koobanyihiin noocyada kale ilaalada sida ilaalada socdaal.

Haddii aad dagantahay guri kiro ah, waxaad u baahantahay uun caymiska guri ee caadiga ah. Haddii aad ku nooshahay guri ku jira heshiis kiro ama guri gooni ah waxaad u baahnaan doontaa caymis gaar gurigaaga. La xiriir shirkadaha caymiska kala duwan oo is barbar dhig qiimaha iyo waxyaabaha ku jira siyaasadaha caymiska si loo hubiyo inaad hesho ilaalada ugu wanaagsan adiga iyo gurigaaga.

Deeq guri

Qoysaska leh carruurta iyo dhalinyarada u dhaxaysa 18 ilaa 28 waxay heli karaan deeq deegaan haddii ay leeyihiin dhaqaale yar. Försäkringskassan waxay la tacaamushaa deeqda guri.

Haddii aad codsato deeq deegaan, sida caadiga ah waa inaad ku nooshahay oo iska diiwaangalisay Iswiidhan si aad xaq ugu yeelato deeqda. Guud ahaan waxaa in sidoo kale laguu diiwaangaliyay ciwaanka meesha aad u codsanayso deeqda.

Haddii, qof weyn ahaan, aad la nooshahay ilmahaaga, wakhtiga oo dhan ama qaar mid uun, waxaa laguu xisaabin qoys leh carruur. Ilmaha wuxuu ku jiri karaa qoyska ilaa ay ka jirsadaan 18 ama ka wayn 18 waxayna heli deeq arday ama waxa la siiyo ilmaha.

Deeq deegaan waa hordhaca deeq. Tan waxaa loo la jeedaa in Försäkringskassan waxay u xisaabisaa deeqda dhaqaalaha la aaminsanyahay inaad heli doonto muddada sannadka. Deeqda deegaan ugu danbeysa waxaa la go'aansan dhamaan, marka canshuurta la go'aamiyo sannadka aad heshay deeq.

Haddii aad heshay dhaqaale ka yar waxa aad filaysay, waxaad laga yaabaa inaad hesho deeq dheeri ah mar danbe. Hase yeeshee, haddii aad heshay dhaqaale ka badan waxa aad filaysay, waa inaad soo celiso lacagta. Sidaa darteed waa muhiim in aad u sheegto si saxan dhaqaalaha sida ugu macquulsan sidaa darteed khatar u gali maysid inaad dib u bixiso lacag badan mar danbe.

Waxaad ka heli kartaa foomamka codsiga deeq deegaan websaydka Försäkringskassan:
www.forsakringskassan.se

Daynta qalab guri

Haddii aad ku timid Iswiidhan qaxooti ahaan ood ku jirto barnaamijka qaabilaadda qaxootiga ama Sharci la Sameeyay, waxaad ka amaahan kartaa lacag CSN inaad ku iibsato alaabada gurigaaga, sida farnijar ka iyo alaabada jikada. Ka akhri waxbadan **www.csn.se/hemutrustningslan**.

Shaqo iyo samayn ganacsi

Waxaa jira qaabab badan oo lagu shaqaysto. Waxaad hoos ka ogaan kartaa xogta ugu muhiimsan eed u baahantahay inaad ogaato in la helo shaqo, loo bilaabo ganacsi iyo waxa ay tahay inaad samayso haddii aad ama noqoto shaqo la'aan.

Booqo Adeegga Shaqaalaysiinta Dadweynaha Iswiidhishka (Arbetsförmedlingen)

Si aad u gasho shaqo xoogsi ah ood qayb uga noqoto bulshada Iswiidhishka sida ugu macquulsan, waa inaad booqataa Arbetsförmedlingen. Hawlgalka Arbetsförmedlingen waa in lagaa caawiyo qaabka aad u shaqaysan.

Haddii aad jirto inta u dhaxeysa 20 iyo 64 (ama si ka badalan 18-19 sano oo da'da ah oodan haysan waalidiin Iswiidhan dhexdeeda) ood heshay sharciga daganaanshaha rasmiga ah qaxooti ahaan ama sababo qaxooti, waxaad xaq u leedahay caawin gaar ah sidaa darteed waxaad heli kartaa shaqo sida ugu dhakhso badan ee ugu macquulsan. Sidoo kale tan waxay dabakhi haddii aad tahay kooxda da'daas ood timid Iswiidhan sababtoo ah waxaad leedahay xubin qoys kaasoo helay sharciga daganaanshaha rasmiga ah qaxooti ahaan ama sababo qaxooti.

Ka akhri wax badan Websaydka Arbetsförmedlingen: **www.arbetsformedlingen.se**. Waxaad sidoo kale ku heli kartaa xogta luuqado kala duwan.

U gudub shaqooyin (instegsjobb)

U gudub shaqooyin waxay u tahay fursad dadka kuwaas oo dhawaan yimid Iswiidhan sida ugu dhakhso badan inay u bartaan luuqadda. Haddii aad heshay sharciga daganaanshaha rasmiga ah 36 bilood ee ugu danbaysay, waxaad heli kartaa u gudub shaqo ayadoo la marayo Arbetsförmedlingen.

Bilaabidda shaqooyin cusub (nystartsjobb)

Haddii aad shaqo la'aan ahayd wakhti badan ama aad ku cusubtahay Iswiidhan, qofka loo shaqaynayo wuxuu heli dhaqaale abaal marin ah shaqaalaysiintaada. Abaal marinta waxaa loo yaqaan bilaabidda shaqo cusub ama bilaabidda shaqo cusub oo gaar ah.
Haddii aad jirsato 21-26 muddada sannadka waxaad heli kartaa

bilaabid shaqo cusub haddii aad shaqo la'aan ahayd ugu yaraan lix bilood sagaalkii bilood ee ugu danbaysay. Haddii aad tahay da'aha kale waa inaad shaqo la'aan ahayd ugu yaraan 12 bilood.

Deeqda dhiiro galinta

Deeqda dhiiro galinta waa lacag aad heli marka aad ka qayb-gasho barnaamijka shaqaalaysiinta suuqa. Arbetsförmedlingen waxay kaa caawin inaad hesho goobta barnaamijka. Marka aad hesho goob, Försäkringskassan waxay bixisaa lacag.

Shaqo la'aanta

Haddii aad ama noqoto shaqo la'aan, waa muhiim inaad iska diiwaangaliso Arbetsförmedlingen sida ugu dhakhso badan ee ugu macquulsan. Hadaba waxaad u muuqan shirkadaha raadinaya shaqaale waxaadna waafaqi shaqooyinka banaan.

Marka aad isdiiwaangaliso ood la yeelato kulanka koobaad Arbetsförmedlingen waxaad bilaabi raadinta shaqo. Arbetsförmedlingen waxay ku siin kartaa caawin iyo talo ku saabsan qaabka, sida casharada shaqo raadinta ee intaranetka, hawlaha xafiisyadooda iyo waanooyin iyo talo ku qoran websaydkooda.

Lacagta caymiska shaqo la'aanta

Markaad tahay shaqo la'aan, waxaad caawin dhaqaale ka heli kartaa a-kassa ama lacagta caymiska shaqo la'anta. Si loo codsado deeqdan, waa inaad iska diiwaangalisay Arbetsförmedlingen. Waxaa sidoo kale jiri kara shuruudo kale ay tahay inaad buuxiso si loo helo deeqda.

Bilaabidda ganacsi

Växjö waa mid ka mid ah magaalooyinka ugu balaaran Iswiidhan. Ka bilaabidda ganacsi aad leedahay Växjö waa doorasho wanaagsan; ma ahan oo kali ah sababta inuu jiro ganacsi wanaagsan halkaan, balse sidoo kalee waa madaama aad heli karto caawin inaad saas samayso. Xafiiska warshadaha iyo ganacsiga maamulka Växjö, shaqaale aqoon badan ayaa xiriir badan la leh kuwaas kuu fududeyn kara inay fuliyaan qorshahaaga. Oo xitaa fududeyn waxyaabaha, waxaad sidoo kale gacan ka heli kartaa hagidda ganacsi. La xiriir xafiiska warshadaha iyo ganacsiga Maamulka Växjö xog dheeri ah. Garaac 00470 410 00 ama booqo **www.vaxjo.se/Naringsliv**o

Hagayaal kale ayaa sidoo kale ku caawin haddii aad rabto inaad bilawdo ganacsi, sida:

- Almi Företagspartner Kronoberg
- Coompanion Kronoberg
- Macken Entrepreneurship Centre (waxay bixisaa waxyaabo sida casharka ganacsi oo ku baxaya Iswiidhish 20-asbuuc.)

Daryeelka caafimaad, daryeelka ilkaha iyo uurka

Haddii aad haysato sharciga daganaanshaha rasmiga ah ood ka diiwaangashantahay Iswiidhan (taasi waa haddii aad leedahay lambarka aqoonsiga sharci) waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad uun sida dhamaan dadka kalee dagan Degmada Kronoberg. Websaydka www.1177.se waxaad ka heli kartaa xog badan oo ku saabsan daryeelka caafimaadka Iswiidhish.

Carruurta magangalyo doonka ah, carruurta aan waraaqaha haysan iyo "carruurta qarsoon" waxay xaq u leeyihiin daryeel caafimaad sida uun dhamaan carruurta kale ee dagan Degmada Kronoberg. Dadka waaweyn ee magangalyo doonka ah waxay xaq u leeyihiin daryeelka xanuunka daran iyo daryeelka kaasoo aan la sugi karin, iyo talada ka hortagga uurka, talada ilmo soo ridid da iyo daryeelka dhalidda. Mararka qaar waxaad bixin doontaa lacag yar bukaanka haddii aad la imaatid kaarkaaga LMA marka aad u imaato daryeel bixiye caafimaad. Waxaad sidoo kale bixin lacag yar dawada badankeed aad ka iibsanayso daawo qoridda dhakhtar haddii aad la imaato kaarkaaga LMA farmasiga.

Xog muhiim ah oo ku saabsan daryeelka caafimaad

SOS Alarm - 112

Garaac 112 haddii qof ku suganyahay khatar waana inaad si dhakhso ah u caawisaa.

Su'aalaha ku saabsan talo bixin - 1177

Garaac 1177 haddii adiga ama qof kale xanuunsanyahay ood rabtid inaad kalkaaliye aad waydiiso talo. waxaad sidoo kale ka. heli kartaa talo ku saabsan meesha laga raadsan daryeel caafimaad Waxaad garaaci kartaa 1177 24 saacadaha maalinta. Kalkaaliyaha wuxuu ku hadlaa Iswiidhish iyo waliba Ingiriis.

Xarumaha caafimaad

Marka aad xanuunsantahay ama aad qabtid calaamado waxaad badanaa ka raadin kartaa daryeel caafimaad xarun caafimaad. Waxaad wici kartaa xarun caafimaad waxaadna iska diiwaangalin ballan. Xarumaha caafimaad waxay furanyihiin wakhtiga maalinta ee maalmaha shaqo.

Waaxda shilalka
Aad waaxda shilalka ee Centrallasarettet (isbitaalka wayn ee Växjö) haddii adiga ama qof kale aad u xanuunsanyahay ama si daran u dhaawacmo oo uu ubaahanyahay caawin dagdag ah. Waaxda shilalka waxay furantahay maalinta oo dhan, maalin kasta.

Daryeelka xanuunka maskaxda
Haddii aad dareemayso maskax ahaan inaadan fiyoobayn badanaa waxaad heli kartaa caawin. Waxaad badanaa garaaci kartaa1177 si aad u hesho talo iyo caawin.

Iibsashada iyo qaadashada daawo
Waxaad ka iibsan kartaa daawadaada Apoteket. Daawooyinka qaar waxaa la iibsan karaa qorid la'aan. Daawooyinka kale waxaa la iibsan karaa oo kali ah haddii uu dhakhtar kuu qoro ama dhakhtarka ilkaha.

Daryeelka ilkaha
Daryeelka ilkaha waxaa fulin kara adeegga ilkaha dadweynaha ee Gobalka Kronoberg ama dhakhtar ilkood oo shakhsi.
Haddii aad tahay magangalyo doon Iswiidhan dhexdeeda waxaad xaq u leedahay daryeelka ilkaha dagdagga. Waxaad badanaa ka heli daryeel adeegga ilkaha dadweynaha waana dhakhtar ilkood kaasoo go'aansada haddii xanuunka aad qabtid yahay mid daran. Carruurta maganagalyo doonka ah iyo dhalinyarada ka yar 18 waxay heli daryeel ilkood sida uun carruurta kale iyo dhalinyarada Iswiidhan; si kale, ayagoon lacag bixin. Dadka waaweyn ee magangalyo doonka ah waa inay bixiyaan daryeelka ilkaha dagdagga ah ee dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarka ilkaha nadiifiya.

Daryeelka uurleyda
Muddada uurka waalidiinta mustaqbalka waxay booqan karaan shaybaarka dhalashada horteed. Halkaan, waalidiintu waxay si joogta ula kulmi karaan umuliso taasoo baari doonta xaaladda ilmaha iyo hooyada. Booqashadu waa lacag la'aan waana mudadawacnimo.

Shaybaarka caafimaadka ilmaha
Dhamaan carruurta jira ilaa 6 waa inay la xiriiraan shaybaarka caafimaadka ilmaha. Tani waa meesha baaritaanada caafimaadka ilmaha lagu fuliyo oo talaalada lagu siiyo. Waxaad sidoo kale ka heli talo la xiriirta koritaanka ilmahaaga.

Turjumaano
Marka aad raadiso daryeel caafimaad waxaad caawin ka heli kartaa turjumaan haddii aadan ku hadal Iswiidhish. Shaqaalaha daryeelka caafimaad ee isbitaalka ama xarunta daryeelka caafimaad waxay kaa caawin doonaan inay kuu balamiyaan turjumaan. U sheeg shaqaalaha daryeelka caafimaad in aad u baahantahay turjumaan marka aad diiwaangaliso booqashadaada. Adeegga turjumaanka waa lacag la'aan.

Daryeelka duqeyda

Marka aad duqawdo waxaad caawin ka heli kartaa maamulka waxyaabo la samaynayo. Iswiidhan dhexdeeda waxaa jira sharci dhahaya in dadka da'da ah ama dadka naafada ah ay xaq u leeyihiin inay helaan taageero iyo caawin waxyaabaha ayna laftirkoodu ayna samayn karin. Haddii aad leedahay sharciga daganaanshaha rasmiga ah waxaad leedahay xuquuq la mid ah muwaadiniinta Iswiidhishka inaad codsato caawintaas. Ka wac xarunta xiriirka magaalada ee 0470 410 00 oo codso inaad la hadasho sargaalka kiiska caawinta ee goobta aad dagantahay. Sargaalka kiiska caawinta wuu kula soo xiriiri doonaa wuxuuna baari caawinta aad u baahantahay. Waxaad mardanbe heli doontaa go'aan ku saabsan caawinta aad heli doontid.
Haddii aadan haysan sharciga daganaanshaha rasmiga ah balse aad u baahantahay caawin iyo taageero inaad yeelato xuquuq inaad codsato caawin guri. Hadaba codsigaaga waa la baari doonaa ayadoo loo eegayo qaybta kale ee Sharciga Adeegyada Bulsho.

Caawinta iyo deeqaha

Mararka qaar dadka waxay u baahanyihiin taageero; tusaale ahaan haddii qof dareemayo si xun, yahay dhibane danbi ama u baahanyahay caawin dhaqaalahooda. Maamulka Växjö xukuumadaha iyo hay'aadaha kale waxay bixiyaan caawinta waxyaabo badan oo noolasha ah.

Caawinta xaaladaha adag
Haddii aad tahay dhibane khilaaf qoys, haddii qof qoyskaaga ah xunyahay ama aad tahay dhibane danbi waxaad caawin ka heli kartaa Maamulka Växjö. Halkaan waxaad ka heli doontaa Familjefrid Kronoberg, meesha aad kula kulmi karto dad kuwaas ku takhususay qaybta khilaafka qoyska. Dhamaan shaqaalaha waxay qabaan waajibaadka sirta booqashadana waa lacag la'aan. Ka akhri wax badan **www.vaxjo.se/familjefrid**
Carruurta Maamulka Växjö, Dadka Da'yarta iyo waaxda Qoysaska (Barn, ungdom och familj) waxay kaa caawin haddii aad qabto dhibaatooyin la xiriira carruurta, dadka da'yarta ama waalidiinta. Waxaad garaaci kartaa 0470 410 00 ama u diri iimayl barn.familj@vaxjo.se. Waxaad sidoo kale booqan kartaa waaxda ee Willans Park 3, Växjö.

Maamulka Växjö waxay sidoo kale ku siin taageero iyo caawin haddii adiga ama qof kuu xiga aad u cabo khamri ama isticmaalo daroogo. Waad soo wici kartaa ama iimay soo dir oo waydii su'aalahaaga. Waxaad gabi ahaan lagaa dhigi karaa qof aan lagaranaynin. Haddii aad rabto inaad samayso codsi ama raadinayso caawin naftaada ama qof kale, waxaad sidoo kale la soo xiriiri kartaa 0470 410 00.

Lambarada taleefoono muhiim ah caawinta iyo taageerada

Maamulka Växjö waxaa jira hay'ado dhawr ah iyo xukuumado aad wici karto haddii aad u baahantahay taageero, caawin daran ama haddii aad u baahantahay uun qof inaad la hadasho. Halkaan waxaa ah liiska lambaro taleefoon oo muhiim ah.

SOS Alarm - 112
Haddii aad ama qof kale ku suganyahay xaalad dagdag ah oo uga baahdo caawin dagdag ah booliska, ambalaas, dabdamis, ciidanka xeebta, adeegga badbaadada buurta, xarunta xogta maxaabiista, dhakhtarka u xilsaaran ama badbaadada hawada, waxaad badanaa soo garaaci kartaa 112.

BRIS, Khadka caawinta carruurta 116 111
Qof kasta oo ka yar 18 sano da'ada wuu soo garaaci karaa wuxuuna kala hadli qof weyn wax walba. Tani waa lacag la'aan lambarkaagana kama muuqan doono taleefonkooda.

BRIS, Khadka caawinta dadka waaweyn - ku saabsan carruurta 077 150 50 50
Dhamaan dadka waaweyn waa la soo dhaweyn inay u soo garaacaan si ayna muuqan. Waxaad u soo wici kartaa kuwaada ama dad kale carruurtooda waxaadna heli xog ku saabsan meesha aad aadi karto inaad hesho caawin dheeri ah.

Brottsofferjouren (khadka caawinta dhibanayaasha danbiga) 0470 456 94
Brottsofferjouren waa hay'ad mutadawac ah oo ka shaqaysa inay hubiso dhamaan dhibanayaasha danbiga inay helaan taageerada ay u baahanyihiin. iimayl: info@vaxjo.boj.se

Kvinnofridslinjen khadka caawinta dumarka 020 50 50 50
Khadka caawinta ee dhibanayaasha handadaadda iyo rabshadda. Haddii aad tahay qaraabo ama saaxiib sidoo kale waa lagu soo dhawaynayaa inaad wacdo. Wicitaankaagu wuxuu noqon doonaa lacag la'aan ayadoon la eegin meesha aad ku nooshahay. Wicitaankaagu kama muuqan doono biilka taleefankaaga.

Socdaalka iyo gaadiidka

Baskiil wadidda iyo socodka
Maamulka Växjö waa inay fududahay in la socdo ama baaskiil la wado. Waxaa jira meelo badan oo lugaynta ah iyo baaskiilka meesha lugaynta iyo baaskiil wadidda ay wadaagaan goobta. Haddii ay suurtogal tahay, dooro meesha lugaynta iyo meesha baaskiilka meeshii aad ka isticmaali lahayd wadooyinka gawaadhida iyo gadiidka kale.
Maamulka Växjö waxay leedahay khariidda baaskiilka oo bilaash ah taasoo aad ka heli karto meelaha sida iridda hoolka magaalada iyo magtabadda magaalada. Khariidada baaskiilka waxay ku siin tilmaamaha ku saabsan meesha aad ku socon karto oo baaskiil ku wadi waxayna kaa caawin in la helo jidad amaan ah. Waxaad sidoo kale ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan shuruucda iyo waxa calaamadaha taraafiig ee kala duwan yihiin.

Meelaha lugaynta
Ku soco dhabe ama jidka sibdhisan haddii uu jiro mid. Haddii uuna jirin jidka sibdhisan, ku soco dhanka bidix ee wadada. Isticmaal meelha laga gooyo haddii ay jiraan oo badanaa si daxadar leh geesaha u fiiri ka hor inta aadan koynin wadada. Isticmaal bikaacyada madawga sidaa darteed waxaad u muuqad taraafiga.

Baaskiil wadidda
Ku wad baaskiilka dhabaha baaskiilka marka uu jiro mid. Baaskiilka ku wad dhanka midig. Haddii ayna jirin dhabaha baaskiilka, ku wad dhanka midig ee wadada. Si kale la mid ah dhica gaariga. Meesha ay tahay inaad wadada jarto badanaa waxaa jira meelo laga gooyo baaskiilada. Halkaan, gawaaridu waa inay siiyaan baaskiilka. Isticmaal bikaacyada laftirkaaga iyo baaskiilkaaga madawga.

Goobta gaari dhigashada
Badhtamaha Växjö lacag ayaad bixin inaad gaariga dhigato. Badhtamaha Växjö waxaa loo kala qaybiyay labo gaari dhigasho; aagga 1 iyo aagga 2. Calaamadda waxay muujin aagga aad ku jirto.

Aagga 1 qiimaha waa SEK 18 saacaddii in kaariga la dhigo:
Maalmaha shaqada 09.00-18.00
Sabtiyada 09.00-12.00
Axadaha: gaari dhigashada waa lacag la'aan

Aagga 2 qiimaha waa SEK 5 saacaddii ama SEK 30 maalinta in kaariga la dhigo:
Maalmaha shaqada 09.00-18.00
Sabtiyada: gaari dhigashada waa lacag la'aan
Axadda: gaari dhigashada waa lacag la'aan

Waxaad ku bixin qadaadiic ama kaarka bangiga mashiinka tikitka. Waxaad dhigi tikitka gaari dhigashada muraayadda hore ee gaariga si cad.

Maalaha qaar meesha ayna jirin calaamado ama ay ku taalo uun calaamadda "P", waa lacag la'aan in gaariga la dhigo. Balse waxaad kali ah oo dhigi kartaa ugu badnaan 24 saacadood.

Haddii aad u dhigto gaarigaaga si khaldan waxaad bixin kartaa ganaaxa gaari dhigashada. Haddii aad u dhigto gaarigaaga si khaldan tikitka ganaaxa gaari dhigashada waxaa la suri doonaa tirtiraha muraayadda hor. Tikirka waxaa ku yaal lacagta aad bixinayso iyo sida aad u bixin.

Gaari dhigashada khaldan waxaa ka mid ah bixin la'aanta lacagta gaari dhigashada, dhigashada meesha basku istaago ama meesha lugta iyo dariiqa baaskiilka ama haddii aad dhigato goobta curyaanka adoon haysan fasaxa dhigashada naafada.

Gaari dhigashada dadka naafada
Waxaad codsan kartaa fasaxa gaari dhigashada gaarka ah haddii ay kugu adagtahay ka dagidda iskaa gaarigaaga meesha aad aadayso.

Waxaad ka codsan ogolaansho maamulka magaalada meesha aad ka diiwaangashantahay ee diiwaanka dawladda. Waxaad ku codsan kartaa ogolaanshaha gaari dhigashada adoo maraya adeegga onlaynka (e-services) iyo foomamka ku jira www.vaxjo.se/invanare. Ogolaanshaha gaari dhigashada waxaa lagu xadiday shakhsi waxaana kali ah la isticmaali karaa marka qofka haysta ogolaanshaha uu la socdo gaariga.

Helidda laysinka darawalnimada
Si aad samayso kaxaynta, si shakhsi ah iyo iskuulka darawalnimada labadaba, waxaad u baahan laysinka darawalnimada sare. Laysinka darawalnimada sare wuxuu dhaqan galaa waxay dabakhdaa shan sano. Waxaad u diri codsigaaga ee laysinkaaga darawalnimada sare adoo raacinaya warqadda caafimaad iyo warbixinta

baaridda indhaha Transportstyrelsen (Hay'adda Gaadiidka Iswiidhishka).

Barashada kaxaynta shakhsiga ah qofka kugu waheliya gaariga waa in sidoo kale haystaa ogolaanshaha baridda. Baraha wuxuu xisaabanyahay darawalka muddada baridda kaxaynta wuxuuna masuul ka yahay ardayga buuxinta shuruudaha ee baridda kaxaynta. Baraha waa inuu ugu yaraan jiraa 24 oo uu haystaa laysinka darawalnimada. Baraha waa inuu haystay laysinka darawalnimada ugu yaraan 5 sano 10 kii sano ee udanbaysay ah waana inuuna ka bixin in kabadan 3 bilood muddadii 3 sano u danbaysay. Ama uuna lahayn baraha laysinka uu haysto xaaladaha la xiriira khamri cabid muddadii 3 saano ee u danbaysay.

Waxaad sidoo kale bixin kartaa casharo qoraal ah iyo layli ficil ah. Marka aad noqoto diyaar waxaad qaadan tijaabada qoraal iyo tijaabada kaxaynta. Marka aad ku baasto labadaasba waxaad heli laysinkaaga darawalnimada.

Dad badan waxay doortaan inay qaataan casharada darawalnimada iskuulka darawalnimada kaasoo sidoo kale agaasimi kara barashada filcilka ah. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad waxkasta ku samayso shakhsi,

Laysinkaaga darawalnimada wadan kale
Haddii aad leedahay laysin darawalnimo kaasoo lagugu siiyay wadan kale, xaaladaha qaar sidoo kale wuu ka shaqeeyaa Iswiidhan.

Laysinka darawalnimada wadan kale kaasoo lagu bixiyay wadan ka baxsan Wadamada Yurub (EEA) kama shaqeeyo Iswiidhan haddii lagaa diiwaangaliyay diiwaanka dawladda halkan in ka badan sannad. Ilaa lagaa diiwaangaliyo diiwaanka dawladda Iswiidhan ma jiro wakhti xadidan inta aad kaxayn karto wadanka dhexdiisa.

Haddii aad haysato laysinka darawalnimada lagu bixiyay wadan ka mid ah Wadamada Yurub (EEA) waad ku kaxayn kartaa inta uu laysinka darawalnimada shaqaynayo. Websaydka **www.korkortsportalen.se** waxaad ka heli kartaa xog badan.

Tareenka

Boosteejada Växjö iyo xarunta socdaalka waxay ku yaalaan badhtamaha Växjö. Halkaan waxaad ku socdaali kartaa tareen – jidka Xeeb ka Xeeb u dhaxeeya Gothenburg iyoKalmar ama Karlskrona iyo Southern Mainline kaasoo aada dhanka koonfur ilaa Malmö (ka dibna xagga Copenhagen) ama waqooyiga Stockholm.

Waxaad iska diiwaangalin kartaa socdaalka ood ka fiirin wakhtiyada tareenka **www.sj.se**
Waxaad sidoo kale xog ka heli websaydka Länstrafiken **www.lanstrafikenkron.se** wax ku saabsan tirada khadadka tareenka iyo sida aad isugu dari bas iyo tareen.

Bas

Ku socdaalidda bas waa badal kale oo wanaagsan deegaan ahaan marka aad ku socdaalayso aagga Växjö ama fogaanshaha dheer. Länstrafiken Kronoberg waxay masuul ka tahay hagidda baska ee magaalada Växjö iyo Degmada Kronoberg.

Haddii aad ku socdaalayso bas xasuusnaw in aad bixinayso SEK 20 tiketkaada haddii aad ubixinaysid cadaan. Si aad u joojiso lacagta dheeriga ah waxaad ku bixin kartaa tikityada:

- kaararka bangiga (VISA/MasterCard) ee bas
- baaqiga Reskortet kaaga ee baska
- tikitka moobaylka eed iibsatay ka hor inta aadan helin baska

Waxaad sidoo kale ka iibsan kartaa tikitka socdaalka mid ka mid ah meelaha iibiya ee Länstrafiken. Websaydka www.lanstrafikenkron.se waxaad qorshayn kartaa safarkaaga waxaadna ka ogaan qiimaha socdaalada kala duwan.

Diyaarad

Garoonka Småland wax yar ayuu u jiraa badhtamaha Växjö, u dhaw Öjaby. Halkaan waxaad ooga duuli kartaa heer qaran iyo heer caalami falaydyo joogto iyo marmar ah.

Gaaridda garoonka waxay qaadataa 15 daqiiqo gaari ama 25 daqiiqo bas marka laga yimaado badhtamaha Växjö.
Dad badan oo ku nool magaalada Växjö oo raba inay u raacaan falaydyada dibadda sidoo kale waxay isticmaalaan garoomada kale, sida Arlanda (Stockholm), Sturup (Malmö), Landvetter (Gothenburg) ama Copenhagen Airport.

Hawlaha

Waxaa ka jira waxyaabo badan oo dhaqan iyo hawlaha ciyaaraha Växjö. Qaar kuwaan ah waa lacag la'aan qaarna waa lacag. Magaalada Växjö.waxay abaabushaa hawlo lacag la'aan ah. Kuwaan waxaa ka mid ah riwaayado, tiyaatarka carruurta iyo hawlaha ciyaaro kala duwan.

Ururo badan waxay leeyihiin hawlo badan ood ka qayb-gali karto haddii aad bixiso lacag waxaadna noqon xubin ururka ah. Waxaad ka heli kartaa xog badan **www.vaxjo.se/upplevaochgora**

Dhaqanka
Waxaa jira hawlo dhaqan oo badan ee dhamaan tijaabada Växjö. Oo kharash badan ma ahan inaad aragto, dhagaysato ama aad samayso dhaqan.

Magtabadda Växjö, waxaad ka amaahan kartaa buug, wargaysyo, CD yo iyo DVD yo. Waxaad sidoo kale ka akhrin kartaa jaraa'idyada wadamo badan oo kala duwan daatabayska. Magtabadda waxkasta waa lacag la'aan.

Marka aad booqato Meesha Farshaxanka Växjö, waxaad arki kartaa tiro carwooyin Iswiidhish iyo farshaxaniistayaal ajaanib ah. Galitaanka meesha farshaxanka waa lacag la'aan.

Fagaaraha Baarkiga Araby wuxuu leeyahay hawlo ciyaaro ah iyo dhaqan oo bilaash ah.

Ka akhri waxbadan oo ku saabsan dhacdooyinka **www.vaxjo.se/evenemangstips**

Hawlaha raaxaysiga iyo ciyaarta
Waxaa jira garoomo badan oo ciyaaraha ah kuwaas oo lacag la'aan ah in la isticmaalo, tusaale ahaan Fagaaraha Baarkiga Araby (Araby Park Arena) iyo waaskada dabaasha ee u dhaw. Haddii aad doonayso inaad isku daydo ciyaaro kale sida fardo fuulid, kubadda usha, ciyaarta barafka iwm., la xiriir urur. Waxaad ka arki

kartaa liiska ururada www.vaxjo.se/foreningsregister Ka akhri waxbadan oo ku saabsan garoomada iyo goobaha ciyaarta www.vaxjo.se/spontanidrottochlek

Aagga iyo dhexda Växjö waxaa jira meelo cagaaran oo badan oo hawlaha raxaysiga ah. Tusaale ahaan, halkaan waxaad ku samayn kartaa, duur xulid, buur fuulid, xero iyo solyo. Qof kasta wuu isticmaali karaa meelahaas, balse qaar ka mid ah waxay leeyihiin shuruuc gooni ah oo ku saabsan waxa aad samayn iyo waxa aadan samayn karin. Ka akhri wax badan oo ku saabsan hawlaha raaxaysiga **www.vaxjo.se/friluftsliv**

Bilaw urur
Urur wuxuu u fasaxaa dadka isku danta ah inay kulmaan oo wadajir wax u qabtaan. Tusaale ahaan, urur waxaad samayn kartaa ciyaar ama hees koox ahaan. Waxaad bilaabi kartaa urur cusub ama waxaad ku biiri mid jira. Ka hel urur halkan **www.vaxjo.se/foreningsregister**

Suuq
Arbacada iyo Sabtida waxaa ka jira suuq Stortorget ee Växjö. Haddii aad jeclaan lahayd inaad yeelato tukaan suuq, waxaad uga baahantahay ogolaansho Maamulka Växjö. Garaac lambarka xiriirka maamulka ee 0470 410 00. Sidoo kale waxaa jira dukaamaha huudhayda aagga iyo dhexda Växjö meeshaas ood ka iibsan karto oodna ku iibin karto

Baro Iswiidhishkaaga
Waxaa jira fursado badan inaad ku barato Iswiidhishkaaga Växjö. Kuwaan waxaa ka mid ah magtabadda iyo Laanqayrta Cas, taasoo leh kayfiska luuqadda oo bilaash ah. Waxaad ka heli kartaa xog ku saabsan baridda luuqadda, tusaale ahaan: **www.vaxjo.se/nyisverige** and **bibliotek.vaxjo.se**

Växjö kommun

Europas grönaste stad